

Waqtiga Qabashada Bixiyaha Oregon Tallooyinka Xirfadlaha Bixiyaha



Tallooyinka xirfadlaha ee loogu tallogalay Bixiyayaasha Adeegsanayo Wakhtiga Bixiyaha Oregon Qabashada Hal abuurka Daryeelka Tooska ah (OR PTC DCI)

Maxaan uga baahannahay inaan sameeyo ka hor waqtiga ugu dambeeyo ee gudbinta?

- Fiiri waqtigaaga si aad u hubisid inay sax tahay oo ay ku jirto gudaha saacadahaaga al ansixiyay.
- Adiga ayaa masuul ka ah inaad gelisid waqtigaaga iyo hubinta inay sax tahay oo ay ku jirto saacadahaaga al ansixiyay.
- Ka hor dhammaadka waqtiga ugu dambeeyo gudbinta muddada lacag bixin walba, fiiri dhammaan gelitaanada waqtigaaga, oo ku samey saxitaano walbo bogga webka ee ORPTC.Dcisoftware.com.
- Fiiri tilmaamaha tallaabo ka tallaabo oo sida loo saxo gelitaanka ka bilaabanayo bogga 103 ee Hagaha Bixiyaha.

Wax badan ka baro sida loo geliyo waqtigaaga.

Ka fiiri [bogga Qoraalada Waxbarashada](#) ee PTC.Oregon.gov si aad u heshid:

- [Hagaha Bixiyaha](#)
- [Hagaha Degdega Websaydka Mobeelka](#)
- [Qaladaadka Gelida Waqtiga Caadiga ah iyo Tallaabooyinka Loo baahanyahay](#)
- [Jadwalka Badelka: saacado/Daqiiqadaha ee Waqtiga Tobanlaha](#)
- [Daawo Fiidiyaha Ku saabsan App-ka Mobeelka OR PTC DCI ee loogu tallogalay Bixiyayaasha](#)
- [Kaleendarka Joornaatiga](#)

2022 Kaleendarka Joornaatiga

Hagahan waxaa loogu talo galay macaamiisha, wakiilada macaamiisha-loo shaqeeyayaasha, shaqaalaha daryeelka guriga iyo daryeelayaasha daryeelka gaarka ah.

[Kaleendarka Joornaatiga for 09/2021 – 01/03/2024](#) (Ingiriisi Form DHS 5754)

[Carabi](#) | [Jayniiska Fudud](#) | [A Jayniiska Rasmiga ah](#) | [Kuuriyaan](#) | [Romanian](#) | [Af Ruush](#) | [Soomaali](#) | [Isbaanish](#) | [Fiyeednaamiis](#)

Maxaa loola jeedaa xaaladaha gelitaanka waqtiga kala duwan?

Heerka	Qeexitaanka
Fur	Bixiyaha ayaa diiwaangeliyay imaanshaha laakin muusan diiwaangelin bixitaanka. Gelitaanka waqtiga ee heerka furan ayaa loola jeedaa inaad hadeer shaqeyneysid ama ilowday inaad diiwaangelisid bixitaanka isbadelka ugu dambeyay.
La sugayo	<p>Gelitaanka waqtiga ayaa la geliyay laakin muusan marin ansixinta tooska ah ee maalinlaha ama ku guuldareystay hubinta nidaamka inta lagu jiray nidaamka ansixinta tooska ah (tusaale ahaan, waqtiga la geliyay ayaa ka badan waxa la ansixiyay). Tani waxay u baahantahay dib u eegida shaqaalaha xafiiska deegaanka. Waad tafaftiri kartaa/saxi kartaa kuwa ka mid ah gelitaanada waqtigaaga ee heerka la sugayo. Haddii gelitaanka waqtiga uusan ku jirin xaalad la sugayo, ma sameyn kartid badelo.</p> <p>Shaqaalaha Homecare waa inay la xiriiraan xafiiska deegaanka APD/AAA, iyo ka qeybgalayaasha daryeelka gaarka ah waa inay la xiriiraan Kooxda Barnaamijka PCA si ay u xaliyaan gelitaan noocaan ah ka hor waqtiga ugu dambeeyo ee gudbinta.</p>
Aan la xaqiijinta	Xubinta shaqaalaha la tafaftiray/waqtiga la geliyay ee matalaada bixiyaha, oo waxay u baahantahay inuu xaqiijiyo xubinta shaqaale kale si loo siiwado. Shaqaalaha ayaa midaan u sameeyo si joogta ah, laakin haddii aad ogaatid gelitaanka waqtigaaga inuu ahaa heer aan la xaqiijin waqti muddo, shaqaalaha Homecare waa inay la xiriiraan xafiiska deegaanka APD/AAA, iyo ka qeybgalayaasha daryeelka gaarka ah waa inay la xiriiraan Kooxda Barnaamijka PCA si ay u xaliyaan gelitaan noocaan ah ka hor waqtiga ugu dambeeyo ee gudbinta.
La ansixiyay	Gelitaanka waqtiga ayaa dhaafay ansixinta tooska ah ama dib ay u eegeen oo ay ansixiyeen xubin shaqaalaha ah oo diyaar u ah in lacag la siiyo. Haddii aad ogaatid baahiyada saxitaanka lagu sameynayo gelitaan la ansixiyay, la xiriir APD/AAA xafiiska deegaanka (PCAs kala xiriir Kooxda Barnaamijka PCA) wixii caawin ah ee shaqaalaha – waxay u baahanayaan inay diidaan gelitaanka si markaas aad u abuurtid waqti taariiqi ah oo leh waqtiga saxda ah.
Diiday	Gelitaanka ku guuldareysto sharciga (sharciyada) ganacsiga ama la diido sababtoo ah inuu qaldanyahay. Gelitaanada wuu diidi karaa habka nidaamka, shaqaalaha, ama macmiilka. Gelitaanada waqtiga la diiday laguma xisaabiyo si lid ku ah saacadahaaga la ansixiyay.
La baajiyay	Gelitaanka waqtiga la ansixiyay ee ka gudbaa saacada saqde dhexe. Markii la ansixiyo, gelitaanka asalka ayaa loo tusiiyaa sida kuwa la baajiyay iyo nidaamka ayaa aasaaso gelitaano cusub maalinta kalendar walba. Waxaad arkeysaa midaan haddii aad ilowdid inaad diiwaaniso bixitaanka isbadelkaaga oo 24+ saacadood. Haddii aad aragtid gelitaan la baajiyay, fiiri gelitaanada waqtiga oo isku taariiqda (taariiqaha) ah – gelitaanadaan waqtiga la xiriiro ayaa muujinayo inay la xiriiraan aqoonsiga duleelsan ee gelitaanka la baajiyay. Dib u eeg oo sax gelitaanadaan.

Heerka	Qeexitaanka
Kooxeysan	Gelitaanka waqtiga ee laggu jiiday qeybta joornatiga la sugayo oo wuxuu sugayaa in laga baaran dago. Haddii aad ogaatid baahiyada saxitaanka lagu sameynayo gelitaanka kooxeysan, la xiriir xafiiska deegaankaaga (PCAs kala xiriir Kooxda Barnaamijka PCA) wixii caawin ah shaqaalaha.
La habeeyay	Gelitaanka waqtiga wuu dhameystiranyahay oo diyaar u yahay in la bixiyo. Haddii gelitaan u baahanyahay in la hagaajiyo, la xiriir xafiiska deegaankaaga APD/AAA (PCAs kala xiriir Kooxda Barnaamijka PCA) wixii caawin ah shaqaalaha.

Su'aalaha iyo jawaabaha caadiga ah

Halkee ayaan ka arki karaa saacadaheyga?	<p>Bogga Saacadaha Guud</p> <p>Bogga Saacadahaaga Guud ayaa bandhigo saacadaha aad ka shaqeysay ee isbuuca lacag bixinta hadeer sida ku saleysan heerka (La ansixiyay, La sugayo, Aan la xaqiijin).</p> <p>Markii aad gashid app-ka mobeelka ama bogga webka iyo diiwaangelinta imaanshaha, waad arkeysaa waqtiga diiwaanka imaanshahaaga iyo saacadaha u xaray macmiilka ee bogga Saacadaha Guud.</p>
Sidee ayaan u abuuraa gelitaanada waqti taariiqi ah (sidee ayaan u galaa waqtiga isbadelada oo aan horaan u shaqeeyay)?	<ul style="list-style-type: none"> • Gelitaanada taariiqiga ah waa in lagu daraa bogga webka. App-ka mobeelka ayaa loogu tallogalay kaliya diiwaangelinta imaanshaha iyo bixitaanka waqtiga dhabta ah. • Tilmaamaha tallaabo ka tallaabo oo sida loo galo gelitaanka taariiqiga ah ee bogga webka ee ka bilaabanayo bogga 96 ee Hagaha Bixiyaha. Waxaad sidoo kale la geli kartaa gelitaanada waqtiga taariiqiga ah ee dooqa laanleenka, laakin waxay qaadataa waqti dheer oo waxay u baahantahay saxiixa macmiilka. Tilmaamaha lagu galayo gelitaanada waqtiga taariiqiga ah oo ay la jiraan dooqa laanleenka ee ku bilaabanayo bogga 65. • Hagaha Bixiyaha
Sidee ayaan u galaa masaafada?	<ul style="list-style-type: none"> • Gelitaanada masaafada waa in la geliyaa Bogga Webka DCI oo lama gelin karo App-ka Mobeelka. Boggaga 100 - 101 ee Hagaha Bixiyaha ayaa bixiyo tilmaamaha tallaabo ka tallaabo oo sida loo geliyo masaafada. Hagaha Bixiyaha
Sidee ayaan u saxaa gelitaanka waqtiga/ masaafada?	<ul style="list-style-type: none"> • Saxitaanada gelitaanka waqtiga waa in lagu dhamesytiraa bogga websaydka. • Tilmaamaha tallaabo ka tallaabo oo sida loo saxo gelitaanka ku bilow bogga 103 ee Hagaha Bixiyaha. Hagaha Bixiyaha

Xiriirada ugu Wanaagsan ee loogu tallogalay Su'aalaha Caadiga ah

Shaqaalaha Homecare		
La isweydiyo	Ururka lala xiriirayo	Taleefonka #/I-meelka/Websaydka
Wixii su'aalaha la xiriiro saacadaha la ansixiyay, saxitaanka gelitaanka waqtiga, xeerarka, iyo lacag bixinada	Xafiiska deegaanka APD/AAA	Raadi xafiiska APD ama AAA
Ku caawinta OR PTC DCI: <ul style="list-style-type: none"> • Kormeerida nidaamka aasaaska • Gelitaanka caawinta • Qaladaadka nidaamka 	La xiriir soo dhaweynta caawinta DCI	1-855-565-0155 ama i-meelka ORPTCSupport@dcisoftware.com
Ka qeybgalayaasha Daryeelka Shaqsiga		
La isweydiyo	Ururka lala xiriirayo	Taleefonka #/I-meelka/Websaydka
Wixii su'aalaha la xiriiro saacadaha la ansixiyay, saxitaanka gelitaanka waqtiga, xeerarka, iyo lacag bixinada	Kooxda Barnaamijka PCA	Kooxda Barnaamijka PCA 503-945-9708 PC.20@dhsosha.state.or.us
Ku caawinta OR PTC DCI: <ul style="list-style-type: none"> • Kormeerida nidaamka aasaaska • Gelitaanka caawinta • Qaladaadka nidaamka 	La xiriir soo dhaweynta caawinta DCI	1-855-565-0155 ama i-meelka ORPTCSupport@dcisoftware.com

Su'aalaha Inta badan La is weyddiyo ee Guddiga Daryeelka Oregon Kulamada Zoom.

Baro jawaabaha su'aalahaaga oo ku taageer adeegsiga OR PTC DCI. Taageerada luuqada waxaa laga heli karaa bixiyayaasha Isbaanishka, Soomaali, iyo Carabi. Wixii ASL ama luuqado kale soo wac ama i-meel usoo dir 877-624-6080 ama OHCC.CustomerRelations@dhsosha.state.or.us.

Horay usu diiwaangeli

Waxaad ka helaysaa lifaaqa diiwaan gelinta ee kulan kasta oo ah OHCC PTC FAQ webseedka Waqti Sheegaha Adeeg Bixiyaha Oregon, <https://www.oregon.gov/DHS/APD/ORPTC/pages/index.aspx>.

Diiwaangelinta kadib, waxaad heleysaa i-meel xaqiijin ah iyo warbixin ku saabsan ka qeybgalka kulanka.



Waxaad ku heli kartaa dokumintigaan luuqado kale, daabacaad balaaran, qoraalka camoolka aa qaabka aad doorbidi. Kala xiriir OHCC 877-867-0077 ama i-meel u soo dir Xiriirada Macmiilka OHCC OHCC.CustomerRelations@dhsosha.state.or.us.